

Wakiilada sharciga Edinburgh



scottish
refugee
council

Updated December 2011

Legal Representative – Edinburgh - Somali

Waa maxay sababta aan u raadiyaa talo sharci?



Dalbashada magangalyo-doon waa hannaan adag waxaanad xaq u leedahay talo sharci.

Aad ayay muhiim u tahay inaad hesho wakiil sharci si aad u hesho talo sharci sida ugu dhakhsaha badan sababtoo ah waxa jira wakhti aad u gaaban si loo bixiyo caddaynta looga baahan yahay taageerada sheegashadaada magangalyo-doon.

Haddaad lacag yar haysato ama se aanad haysanba, waxaad u dhawdahay inaad xaq u yeelato talada sharciga bilaashka ah si lagaaga caawiyo sheegashadaada magangalyo-doon. Wakiilkaaga sharciga ayaa sharxi doona tan, xaqiiqsanna doona waxay kuu qaban karaan.

U furnaw daacadna u ahaw wakiilkaaga sharciga

Inkasta ooy dhici karto inay kugu adkaato ka hadalka waxyaabaha qaar kugu dhacay, wakiilkaaga sharcigu kuuma caawin karo si buuxda ilaa uu ogaado waxyaabahaas. Waxa sidoo kale wax caawin karta sheegashadaada magangalyo-doon haddaad kala hadasho waxkasta wakiilkaaga sharciga.

Sida loo helo talo sharci

Liiska hoos ku qoran wuxuu ku siinayaa macluumaadka lagala xidhiidhayo qaar ka mida wakiilada sharciga jooga **Edinburgh** ee bixinaya talada magangalyo-doonka. Waxaad isticmaali kartaa liiskan si aad u xulato wakiil sharci ulana xidhiidho adoo isticmaalaya tafaasiisha hoos lagugu siisyey.

Waxa muhiima inaad ogaato in liiskani aanu ahayn mid dhammaystiran ee la heli karo wakiilo sharci oo kale. Ka mid noqoshada shirkad ah wakiilo sharci lama macno ah ayidis iyo/ama talo ka bixin ay samaysay Scottish Refugee Council. Magacyo kale oo wakiilo sharci ah ayaa laga heli karaa Law Society of Scotland adoo garaacaya 0131 226 7411.

Haddaad dareento inaad ka heshay talo liidata ama adeeg aan kugu fillayn wakiilkaaga sharciga, waxaad u caban kartaa Xafiiska Wakiilka Haajiridda (OISC). Faahfaahin dhammaystiran oo ku saabsan samaynta cabasho waxa laga heli karaa websaaydkooda: <http://www.oisc.gov.uk>

Sida loo sameeyo cabasho

Samaynta cabasho ma saamaynayso sheegashadaada magangalyo-doon ama xaaladdaada haajiridda.

Haddaad dareento inaad ka heshay talo liidata ama adeeg aan kugu fillayn gar-yaqaankaaga Scottish-ka ah (wakiilkaaga sharciga), waa inaad marka hore ugu gudbisaa cabashadaada qoraal wakiilkaaga sharciga ood u oggolaataa afar toddobaad oo uu ku soo xalliyo.

Haddii cabashadaada aan lagu soo xallin afar toddobaad gudahood, waxaad cabasho qoran oo rasmi ah u diri kartaa Wakiilka Cabashooyinka Sharciga Scottish-ka (SLCC). Hadduu qoraalku kugu adag yahay, waxaad ka wici kartaa iyaga si aad caawimo u hesho 0131 528 511.

Cabashadaada qoran waa inaad ku dartaa tafaasiisha dhammayskatiran ee cabashadaada oo ku qoran erayo aad leedahay oo ah, sida tani kuu saamaysay iyo sidaad jeclaan lahayd in cabashadaada loo xalliyo. Waa inaad saxeexdaa cabashadaada qoraalka ah sidoo kale.

Tafaasiisha dhammayskatiran ee ku saabsan samaynta cabasho waxa laga heli karaa websaaydkooda: <http://www.scottishlegalcomplaints.org.uk/how-to-complain/complaint-form.aspx>

Wakiilada Xeerka ee Edinburgh:

Xarunta Sharciga Dadka Tirada yar

103-105 Morrison Street
Edinburgh
EH3 8BX
Tilifoonka: 0131 229 2038
Fax: 0131 229 2039
Edinburgh@emlc.org.uk

Drummond Miller

32 Moray Place
Edinburgh
EH3 6BZ
Tilifoonka: 0131 226 5151
Fax: 0131 225 2608
dbrown@drummond-miller.co.uk

McGill & Co

34 Lochrin Buildings
EH3 9ND
Tilifoonka: 0131 228 2083
Fax: 0131 228 2133
vdouglas@mcgillandco.co.uk

D Duheric & Co Solicitors

23 Castle Street
Edinburgh
EH2 3DN
Tel: 0131 225 5444
Mobile: 07427049669
Skype: dduheric
Damir.duheric@dduhericsolicitors.co.uk
www.dduhericsolicitors.co.uk